



Wax-weydiinta howlgelinta carruurnimada hore ee bulshooyinka dhaqan ahaan iyo luuqad ahaan kala duwan (CALD)



Baarlamaanka Victoria wuxuu samaynayaa wax-weydiin ku saabsan howlgelinta caruurnimada hore ee qoysaska dhaqamada kaladuwan.

Howlgelinta caruurnimada hore waa laga bilaabo 0 ilaa 8 sano waxaana ku lug yeelan kara barnaamijyo iyo adeegyo la xiriira caafimaadka, waxbarashada, daryeelka-caruurta, kooxaha ciyaaraha, xarumaha qoysaska, isboortiga iyo madadaalada, iyo maktabadaha deegaanka.

Waxaan jecel nahay inaan maqalno waayo-aragnimadaada iyo fikradahaaga ku saabsan:

- Adeegyadee ayaad isticmaashaa? (Tusaalooyinka qaarkood waa kalkaaliyayaasha caafimaadka hooyada, kiindhaha, koox ciyaaredka)
- Sidee bay u anfacayaan ilmahaaga iyo qoyskaaga?
- Sidee loo horumarin karaa?
- Ma heshaa macluumaad kugu filan oo ku saabsan adeegyadan?

- Maxaa kaa horjoogsanaya ka-qaybgalka adeegyadan?
- Waa maxay taageerada kale ee aad u baahan tahay inta carruurtaadu ay dhallinyarta yihiin?
- Sidee buu ilmahaaga iyo reerkaaguba u dareemaan inay ku xiran yihiin bulshada deegaanka?

Soo-gudbinta ayaa dabooli karta mid ama dhammaan su'aalahaan.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan soo gudbinta, ka eeg: parliament.vic.gov.au/caldchildinquiry

Soo gudbinta waxaa la sameyn karaa ilaa **11 Oktoobar 2019**.

Haddii aad u baahan tahay caawimaad si aad ugu qorto Ingiriisiga ama aad wax su'aalo ah qabtid, fadlan nagala soo xiriir email caldchildinquiry@parliament.vic.gov.au ama wac **(03) 8682 2846**.

Dhammaan waxyaabaha la soo gudbiyo waxaa loola dhaqmayaa sidii dukumentiyada dadweyne ilaa qarsoodinimada la codsado oo la bixiyo mooyee.